

DEMAC
DIASPORA EMERGENCY ACTION & COORDINATION

# KA-QAYBGALKA QURBO-JOOGTA EE HAWLAHA BANI'AADAMNIMADA EE SOOMAALIYA

## DARAASEYNTA WAQTIGA LA JOOGO

USAID FROM THE AMERICAN PEOPLE

IOM UN MIGRATION



# MAHADNAQ

Kooxaha cilmi-baarista ee DEMAC iyo Consilient waxay u mahadcelinayaan xubnaha jaaliyadaha qurba-joogta Soomaaliyeed ee ku nool daafaha dunida, iyo wakiillada ururrada maxaliga ah, hay'adaha ka shaqeeya arrimaha bani'aadamnimada, hay'adaha dowladda, iyo khubarrada taageeray Daraasaddan Waqtiga La Joogo (RTR), iyagoo bixinaya macluumaad oo dad la wadaagaya waqtigooda, aqoontooda iyo waayo-aragnimadooda.

Warbixintan waxaa suurageliyay taageero laga helay Xafiiska Gargaarka Bani'aadamnimada ee hay'adda USAID, ee hoos-imaanaya mashruuca wadajirka ah, "Sii Wanaajinta Hawlgallada iyo Isuduwidda Qurba-joogta ee Gargaarka Bani'aadamnimada  si ay saameyn dheeraad ah ugu yeeshaan iyada oo loo marayo Qaab-guud oo Qurba-joogtu uga Qaybgalaan Gargaarka Bani'aadamnimada – Wajiga III."/ "Enhancing Diasporas' Operations and Coordination in Humanitarian Assistance for increased impact within a Framework for Diaspora Engagement in Humanitarian Assistance – Phase III." Mashruucu waa iskaashi ka dhaxeeya Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM) iyo DEMAC. Fikirkan halkan lagu muujiyay waa kuwo u gaar ah qorayaasha oo kama turjumaan aragtiyaha USAID, IOM ama DEMAC.

Daraaseyntan Waqtiga La Joogo waxaa la sameeyay intii u dhaxeysay bilaha Luulyo iyo Nofembar 2023 waxaanna sameeyay kooxda cilmi-baarista Consilient ee Hannah Marcus, Maxamed Aamin Cabdiraxmaan, Cabdulqaadir Axmed Maxamed iyo Mubaarik Cabdillaahi.

Waxaa la daabacay Jannaayo 2024.

# NUXURKA WARBIXINTA OO KOOBAN

## Raadraac

Soomaaliya waxaa tobonnaankii sano ee la soo dhaafay la soo darisay shiddo iyo dhibaatooyin degdeg ah oo soo noqnoqda, iyadoo musiibooyinka cimilada, colaadda, iyo waxyaabaha kale ee gunta u ah ee kicinaya ee qayb ahaan sababaya baahiyada bani'aadamnimada ee mar walba taagan. Culeysyadan waxaa u sii dheer caqabado la xiriira gaarista oo xannibaad ku noqda qaar ka mid ah dadka ugu nugul lala gaaro gargaar naf-badbaadin. Cilmi-baaris hore ayaa ku talisey in qurba-joobta Soomaaliya ay door muhiim ah ka qaataan wax-ka-qabashada xaaladaha degdegga ah ee bani'aadamnimada ee guud ahaan dalka, iyada oo badanaa noqda kuwa ugu horreeya ee wax-ka-qabanaya iyo iyaga oo buuxinaya daldaloollada muhiimka ah ee qaybta/waaxda. Si kastaba ha ahaatee, qaababka Hawgal ee u gaarka ah ee ay adeegsadaan ururrada qurba-joogta/diaspora organizations (DOs) iyo awoodahooda iyo caqabadahooda ka xooggag bani'aadamnimo ahaan ayaa ah kuwo si liidata loo diiwaangeliyo oo sahamintooduna ay hooseyso.

Daraasadan/Dib-u-eegistan waqtiga la joogo (RTR) ee wax-ka-qabashada qurba-joogta Soomaaliyeed ee dhibaatooyinka bani'aadamnimada ayaa waxaa loo nakhshadeeyay wax-ka-qabashada daldalloolkan aqooneed. Laba dhibaato oo Soomaaliya dhowaan ka dhacay ayaa bixinaya kiisas diiradda saaraya wax-ka-qabashada arrimaha bani'aadamnimada ee qurba-joogta ee RTR: fatahaadihii xilli-roobaadka Gu'ga ee ka dhacay magaalada Beledweyne gu'gii 2023 iyo colaadda sii kordheysa ee u dhaxeysa dowladda Soomaaliya iyo Kooxaha Hubeysan iyo Maamullada kale (AGDAs) ee Jubbaland ka dhacay intii u dhaxeysay Agoosto 2022 ilaa Agoosto 2023.

Waxyaabihii lagu soo ogaaday iyo soo-jeedimaha laga helay RTR waxaa loogu talagalay in ay gacan ka geystaan iskaashiga  iyo isuduwidda wanaagsan ee u dhaxeeya qurba-joogta iyo xooggaga kale, iyo wax-ka-qabashada arrimaha bani'aadamnimada ee xoogeystey ee guud ahaan Soomaaliya.

## Qaabka daraasadda loo sameeyay

Wadar ahaan 86 ururro qurba-joog Soomaaliyeed oo xarumahooda dhexe ay ku kala yaallaan 13 dal ayaa la khariidadeeyay iyadoo la adeegsanayo baaris baraha internet-ka ah iyo wadatashiyo lala yeeshay ururrada iyo xubnaha qurba-joogta. Khariidadaynta ururrada qurba-joogta (DOs) ayaa iftiimisay kala duwanaanshahooda iyo sidoo kale waxyaabaha muhiimka ah ee ay isaga mid yihiin ee dhinacyada ay ka midka yihiin isbedbedelka heerarka hawlahooda, adeegsiga dhaqaale ururinta iyo deeqaha qurba-joogta ee lacag ururinta, iyo diirad-saaridda qaybaha badan ee guud ahaan hawlaha bani'aadamnimada iyo horumarinta.

Marka laga soo tago khariidadaynta ururrada qurba-joogta (DO), aragtiyo dheeraad ah oo loogu talagalay RTR ayaa waxaa laga helay wareysiyo tayo-sheeg ah oo lala yeeshay 23 war-bixiyayaal muhiim ah oo ay ku jiraan toddobo wakiil oo ka socda lix ururro qurba-joog kuwaas oo wax-ka-qabtey mid ama labada dhibaato ee la daraaseynayo, saddex daneenayaal heer-degmo ah (laba wakiil oo ka socda xafiis-hoosaad heer degmo oo Dallad NGO Soomaaliyeed iyo laba NGO maxalli ah), lix daneeyayaal heer-qaran ah (laba wakiil oo ka socda urur qurba-joog Soomaaliyeed ay leedahay, laba hawl-wadeen oo ka shaqeeya hay'ado arrimaha bani'aadamnimada ka shaqeeya, laba xafiis oo dowladda heer qaran ah), iyo lix wakiil oo ka socda bulshooyinka helaya taageerada qurba-joogta.

## Waxyaabihii la ogaadey

Qiimeyntii lagu sameeyay wax-ka-qabashada bani'aadamnimada ee dhibaatooyinkii Beledweyne iyo Jubbaland, Daraasada RTR waxaa lagu oggaaday tusaalooyinka halka shabakadda ballaaran ee Ururrada Qurba-joogta Soomaaliyeed iyo xiriirrada dhow ee ay la leeyihiin bulshooyinka ay dhibaatadu taabatey u suuragelisay in ay haqabtiraan baahida bini'aadantinimo ee muhiimka ah iyo gaarista dadka ay adagtahay in la gaaro. Wax-ka-qabashada dhibaatada Beledweyne waxaa la ogaaday in guud ahaan ay ahayd mid si rasmi ah loo qaabeeyay oo la dhexgaliyay nidaamka bani'aadamnimada ee ballaaran, iyadoo ay ugu wacan tahay in si wanaagsan uu waxqabadku ugu muuqdo xoogagga dowladda, hay'adaha iyo kuwa maxalliga ah. Dowlad-goboleedka Jubbaland, waxqabadka ururrada qurba-joogta wuxuu ahaa mid aysan inta badan ka warqabin xooggaga kale ee bani'aadamnimada inkastoo uu taageero weyn u ahaa bulshooyinka ay dhibaatadu saameysay. Labada waxqabadba, waxaa ka jiray daldalloolo xagga dokumentiyada iyo isuduwidda lala leeyahay hay'adaha arrimaha bani'aadamnimada ka shaqeeya, taas oo sii xaqiijinaysa isbeddellada horey loo aqoonsaday ee ah in ururrada qurba-joogta ay inta badan u shaqeeyaan qaab aan rasmi ahayn, oo dadka ka dedan ama ka qarsoon.

Natiijooyinka daraasadda RTR waxay sii kordhinayaan caddaymaha muujinaya in ururrada qurba-joogtu ay door muhiim ahi ka qaataan hawlaha wax-ka-qabashada arrimaha bini'aadantinimada ee Soomaaliya. Qaar ka mid ah awoodaha waaweyn ee ururrada qurba-joogta ay leeyihiin ee la aqoonsaday waxaa ka mid ah xirfadaha lacag-ururinta ee loo marayo habab lacag-ururin oo ay dhaqaaluhu dad badani ururinayaan, awood maaliyad abaabul degdeg ah, kheyraadyo farsamo iyo kuwo aadame si loo gaaro dadka ay dhibaatadu saameysay bilowga xaalad degdeg ah, iyo in ay si xooggan ugu xiran yihiin bah-wadaagta maxalliga ah, mutadawaciinta iyo hawl-wadeennada.

Ku-xirnaantan degaanka waxay ka tarjumaysaa faa'iidooyin badan oo ay ka mid yihiin awoodaha lagu gaarayo
dadka ay adag tahay in la gaaro, fahamka xaaladaha degaanka iyo qaabka qabiilka u shaqeeyo, hanashada kalsoonida bulshada, dhexdhexaadinta khilaafaadka ka dhex taagan beelaha, iyo qorista iyo isuduwidda shabakadaha ballaaran ee muta-dawaciinta loogu talagalay fulinta mashruuca dhabta ah ee degaanka laga fulinayo.

Marka laga soo tago aqoonsashada awoodaha iyo wax-ku-biirinta, daraasadda RTR waxay sidoo kale iftiimisay caqabadaha muhiimka ah ee ay ururrada qurba-joogta (DOs) wajahaan, sida in aysan helin maaliyado caalami ah, nusqaamo ka jira xagga fahamka iyo isuduwidda ee u dhaxeeya ururrada qurba-joogta (DOs) iyo hay'adaha arrimaha bani'aadamnimada ka shaqeeya iyo in aysan aqoonsi iyo kalsooniba ka helin hay'adaha deeq-bixiyeyaasha ah iyadoo ay sabab u tahay cillado loo arko in ay ka dhallanayaan dhanka isla-xisaabtanka.

Daraasadda RTR ee wax-ka-qabashada dhibaatooyinka bani'aadamnimada ee qurba-joogta Soomaaliyeed, ee diiradda lagu saarayo
Fatahaadihii gu'gii 2023 ka dhacay magaalada Beledweyne iyo colaadda Jubbaland, waxay caddaynaysaa doorka ay qurba-joogta ka qaateen wax-ka-qabashada
arrimaha bini'aadantinimada ee Soomaaliya. Iyadoo la tixgelinayo awoodaha iyo caqabadaha ay wajaheen xooggaga qurba-joogta Soomaaliyeed, soo-jeedimahan soo socda ayaa la bixiyay si loo xoojiyo qiimaha ururrada qurba-joogta (DOs) iyada oo ah ururro wax-ka-qabanaya arrimaha bani'aadamnimada iyadoo lala tacaalayo caqabadaha horyaalla
ku lug lahaanshahooda iyo isuduwidda qaybaha bani'aadamnimada:

## Soo-jeedimada loogu talagalay ururrada qurba-joogta (DOs):

- Macluumaadka ku saabsan hawlaha si joogto ah ugu diiwaangeliya, ugu xayaysiiya, oo ugu faafiya mareegaha ururrada qurba-joogta (DO) iyo boggaga baraha bulshada si loo xaqiijiyo kor-u-qaadista wacyiga iyo fahamka shaqada ururrada qurba-joogta ee xooggaga hay'adeed, qurba-joogta kale, iyo bah-wadaagta maxalliga ah.
- Ka-qaybgala madallada isuduwidda ay qurba-joogta hormuudka ka yihiin oo la sameeyo madallo cusub haddii loo baahdo (t.a., kuwo goob- ama qayb-gaar u ah) si aad u sii wanaajisaan wadahadalka, u-qareemaynta, iyo aqoon wadaagista u dhaxeysa ururrada qurba-joobta (DOs) Soomaaliyeed iyo in aad si wadajir ahaan ah u xoojisaan ka-qaybgalka DOs kulannada isuduwidda wax-ka-qabashada arrimaha bani'aadamnimada ee xooggaga hay'adaha arrimaha bani'adamnimada ka shaqeeya iyo xooggaga maxalliga ah.
- Raadiya fursado dheeraad ah oo lacag looga soo ururinayo shabakadaha qurba-joogta daafaha caalamka ku sugan iyo kuwan gobolka si lacag-ururinta looga dhigo mid hufan oo loo abuuro fursado maaliyadeed oo kor loogu qaadayo hawlaha bani'aadamnimada.
- Si wadajir ah dib-u-eegis ugu sameeya geeddi-socodyada iyo hab-dhaqannada loogu talagalay xulashada ka-faa'iideystaha, si loo xaqiijiyo in ay la jaanqaadaan mabaadii'da bani'aadamnimada iyo in aysan si xun ugaga sii darin nuglaanta horey u jirtay ama in aanay waxyeello keenin. Marka hab-dhaqannada wanaagsani la aqoonsado, diiwaangeliya, oo la wadaaga hab-dhaqannadan ururrada kale ee qurba-joogta (DOs) una gudbiya hay'adaha arrimaha bani'aadamnimada ka shaqeeya si looga hortaggo faham khaldan oo laga qaato. Markay habboon tahay, la kaashada qurba-joogta iyo hay'adaha maxalliga ah iyo hay'adaha kale ee ka shaqeeya arrimaha bani'aadamnimada si ay u sii wanaajiyaan hababka loo gaaro kuwa ugu baahida badan.

## Soo-jeedimada loogu talagalay hay'adaha ka shaqeeya arrimaha bani'aadamnimada:

- Maaliyad iyo shaqaale ku bixiya xoojinta kartida ururrada qurba-joogta iyadoo loo marayo, tusaale ahaan, bixinta taageero horumarin hay'adeed, taageero farsamo, ama towjiihin iyadoo la adeegsanayo qaabab debecsan oo ku saleysan codsiyada iyo baahiyada ururrada qurba-joobta (DOs).
- In ay isku-xiraan awoodaha ururrada qurba-joogta sida bah-wadaag bani'aadanimo ahaan, sameynta, isticmaalka, iyo tijaabinta qaababka guud ee hawlgallada ee jira ee loogu talagalay wada-shaqeynta lala yeelanayo qurba-joogta, sida Qaabka-guud ee Ka-qaybgalka Qurba-joogta Gargaarka Bani'aadamnimada[1].
- Ku martiqaada oo yareeya caqabadaha ururrada qurba-joogta ka hor taagan in ay helaan hababka isuduwidda lala leeyahay hay'adaha iyo ururrada maxalliga ah (sida, kulannada kutladaha) tusaale ahaan iyadoo la siinayo taageero maaliyadeed oo ay ku bixinayaan kharashaadka la xiriira waqtiga hawlwadeennada, saadka, iwm. si loo kordhiyo isuduwidda iyo macluumaadka lala wadaago qurba-joogta wax-ka-qabanaysa arrimaha gargaarka bani'aadamnimada.
- La-hawlgala ururrada qurba-joogta si looga faa'iideysto khibradooda maadaama ay yihiin xooggag caalami ah oo aqoon u leh xaaladaha caalamka iyo kuwa maxalliga. Iskaashiyadu waxay noqon karaan qaabka bixinta maalgelin toos ah oo la siinayo ururrada qurba-joogta (DOs) si ay u kordhiyaan waxqabadyadooda gaarka ah ama in lagu biirriyo ururrada qurba-joogta (DOs) adeegyada la-talinta xaaladaha degaanka ee meelaha ay adagtahay in la gaaro, iyo/ama goobaha ay ka jiraan dhaqdhaqaaqyo qabiil oo aad u adag, iyadoo la aqoonsanayo aqoonta gaarka ah ee ay leeyihiin.

[1] Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (IOM), 2023. Qaabka-guud ee Ka-qaybgalka Qurba-joogta Gargaarka Bani'aadamnimada. IOM. https://www.idiaspora.org/en/learn/resources/project-materials/framework-diaspora-engagement-humanitarian-assistance

Soo-jeedimada loogu talagalay DEMAC, IOM iyo bah-wadaagta kale ee taageerada qurba-joogta:

- Bixinta kobcinta kartida iyo taageero farsamo oo la halmaalla baahiyaha ay ururrada qurba-joogta ay sheegeen si ay u taageeraan una xoojiyaan doorkooda wax-ka-qabashada arrimaha bani'aadamnida a ee ku saabsan mowduucyada sida isla-xisaabtanka (oo ay ku jiraan korjoogteynta iyo ka-warbixinta), dhaqaale ururinta, iyo mabaadii'da bani'aadamnimada.

- Taageeridda iyo fududeynta isuduwidda iyo iskaashiga u dhaxeeya ururrada qurba-joogta (DOs). Arrintan ayaa la gaari karaa iyada oo la taageerayo dadaallada hadda jira ama iyada oo la taageerayo sameynta madallo barta internet-ka ah oo loogu talagalay isuduwidda ururrada qurba-joogta (DO) oo joogto ah, qabashada shirar qof ahaan la isugu imaanayo, iyo taageeridda ururrada qurba-joogta (DOs) si loo hago culeysyada hawlgalka ee isuduwidda. Meelaha muhiimka ah ee isuduwidda lagu xoojin karo waa dhaqaale ururin wadajir ah, qorsheynta mashruuca, hawlgalka waxqabashada iyo aqoon wadaagis.

- Taageeridda ururrada qurba-joogta ee ka hawlagallaya guud ahaan Soomaaliya in ay yeeshaan hoggaan mideysan oo qurba-joogta ku meteli kara madallada ku habboon iyo meelaha ay ku kulmaan hay'adaha bani'aadamnimada, OCHA, iyo daneeyayaasha.  Waa in dadaallo lagu bixiyaa si loo xaqiijiyo in beelaha laga tiro badan yahay  ay metelaad ku leeyihiin hoggaanka qurba-joogta, oo ay ku jiraan gudaha xubinnimada Golaha Qurba-joogta dhowaan la sameeyaya ee DoDA.

- Taageeridda iyo fududaynta madallo u gaar ah wada-shaqeynta, shabakadda, isuduwidda iyo iskaashi-dhiska u dhaxeeya ururrada qurba-joogta (DOs) iyo hay'adaha arrimaha bani'aadamnimada ka shaqeeya. Kuwani waxaa ka mid noqon kara shirar, kulamo, iyo aqoon-isweydaarsiyo farsamo oo qaybta-gaar u ah halkaasi oo xooggaga ay khuseyso isugu imaan karaan si loo dhiso kalsoonida iyo is-fahamka shaqada midba mid kale, iyadoo la tilmaamayo fursadaha dheeraadka ah ee ay iska kaashan karaan.

- In la sii-wado in si nidaamsan loo korjoogteeyo, diiwaangeliyo, oo kor loogu qaado hawlaha iyo dadaallada xoogagga qurba-joobta si loo sii kobciyo horumarka socda ee ku aaddan kordhinta muuqashada qurba-joogta Soomaaliyeed iyo soo-jiidashada in ay si aad ah u daneeyaan deeq-bixiyeyaasha, bah-wadaagta, iyo daneeyayaasha qaybta kuwaas oo weli adeegsan faa'iidooyinka buuxa ee ka-qaybgalka qurba-joogta.

Soo-jeedimadan marka la qaato, horumar aasaasi ah ayaa laga sameyn karaa adeegsiga awoodda buuxda ee qurba-joogta si ay wax ugu biirriyaan qaybta bani'aadamnimada ee Soomaaliya.

DEMAC

DIASPORA
EMERGENCY ACTION
& COORDINATION

Nuxurka ama waxa ku jira waxaa ka mas'uul ah:

DEMAC – Isuduwidda wax-ka-qabashada qurbajoogga ee xaaladaha degdegga ah Danish Refugee Council/Diaspora Emergency Action & Coordination
At Danish Refugee Council
Borgergade 10
1300 Copenhagen
Denmark

Email-ka: info@demac.org
Telefoonka: +45 6026 8116

Sawirada waxaa iska leh:
Jeldiga hore: © DRC
Bogga 2aad: © DRC